**Dembiyada Nacaybka Ku Salaysan & Dhacdooyinka Eexashada**

**Waa Maxay Dembiga Nacaybka Ku Salaysan?**
Gudaha Washington, dembiga nacaybka ku salaysan waa falka xaasidnimada iyo ula kaca ah ee ah gacan-qaad, waxyeello hanti, ama hanjabaada gacan-qaadka ama waxyeello hanti oo lagula kaco qof kale iyadoo qofkaasi loogu cuskanayo isirkiisa muuqda, midab, diin, abtir, wadanka uu ka soo jeedo qofka, jinsiga, rabitaanka jinsi, muujinta ama aqoonsiga jinsi, ama naafo maskaxeed, jireed, ama dareen.

Dembiga nacaybka ku salaysan waa dembi culus gudaha Washington, kaasoo xanbaarsan ugu badnaan shan sano oo xabsi ah iyo/ama $100,000 oo ganaax ah. Dhibanaha loo gaysto dembi nacayb ah wuxuu sidoo kale keeni karaa dacwad madani ah oo ka dhan ah qofka ku kacay dembiga ee magdhowga waxyeellada dhabta ah, ciqaabta waxyeellada oo gaarayso ilaa $100,000, iyo khidmadaha iyo kharashaadka macquulka ah ee ku baxay qareenada inay dacwada keenaan (Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib Loo Eegay ee Washington) 9A.36.080).

**Waa Maxay Dhacdo Eexasho?**
Gudaha Washington, dhacdo eexasho ah waa cadaawad u muujinta qof kale **taasoo ku salaysan waxa dhabta ah ama muuqda ee qofka ee ku salaysan isirka, midabka, caqiidada, diinta, abtirsiinta, asalka qaran, muwaadinimada ama xaaladda socdaalka, jinsiga, ciidanka si sharaf leh uga bixidda ama xaalad milatari, rabitaanka jinsi, ama jiritaanka wax kasta oo ah naafo dareen, maskaxeed, ama jireed ama isticmaalka hage eey tababaran ama xayawaan adeeg ee qofka naafada ah** (RCW 43.10.305(5)(a)). Liiska sifooyinka waxaa ka mid ah sifooyinka hoos yimaada sharciga dembiyada nacaybka ah ee Washington iyo dabaqadaha lagu ilaaliyo Washington Law Against Discrimination (Sharciga Washington ee Kadhanka ah Takoorka) (RCW 49.60.030(1)).

“Cadaawad u muujinta” micnaheedu waa muujinta fikrad nacayb ama eexasho ah oo lagu muujiyo si khaldan, soo dhawayn la'aan ah, oo qallafsan. **Dhacdo eexasho waa dhacdo aan gaarsiisnayn heerka dembiga ama fal-dembiyeedka.** Tusaalooyinka dhacdooyinka eexashada waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn:

- Adeegsiga luuqad aflagaado ah oo loo adeegsado qof kale iyadoo lagu salaynayo sifooyinka muuqda ee qofka ama dabaqadda la ilaaliyo.
- Samaynta sawiro ama suurooyin cunsurinimo ah ama aflagaado ah iyadoo lagu salaynayo sifooyinka muuqda ee qofka ama dabaqadda la ilaaliyo.
- Ku jeesjeesidda qof naafo ah ama caadooyinka ama dhaqamada qofka.

**Khadka Caawimada Dembiyada Nacaybka Ku Salaysan & Dhacdooyinka Eexashada**

AGO, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (Attorney General's Office) ee Washington waxaa la faray inuu sameeyo Khadka Caawimada Dembiyada Nacaybka Ku Salaysan & Dhacdooyinka Eexashada (Hate Crimes & Bias Incidents Hotline) oo lagu faray Senate Bill (SB, Xeerka Golaha Guurtida) 5427 (2024), ee ay meelmarisay waaxda sharci dejinta sanadki 2024 lana siiyay xeerka tirsigiisu yahay RCW 43.10.305. Khadka Caawimada waa inuu xog siiyaa dadka soo waca iyo u gudbinta adeegyo maxalli ah, dhibbanaha ku taxaluqa, dhaqan ahaan karti leh, oo xog ogaal u ah dhibaatada, iyo, ilaa intii suurtagal ah, lagu heli karaa luuqado badan. Khadka Caawimada waxaa laga heli doonaa degmooyinka Clark, King, iyo Spokane laga bilaabo Luulyo 1, 2025, lagana helaa gobolka oo dhan laga bilaabo Janaayo 1, 2027. **Khadka Caawimada waa khad loogu talagalay xaaladaha aan degdegga ahayn, waxaana dadka soo waca lagu hagaajin doonaa inay wacaan 911 haddii ay soo sheegayaan xaalad degdeg ah.**

**Qof kaste oo dhibane u ahaa nacayb ama eexasho wuxuu wici karaa khadka caawimada si uu u sheego dhacdo una helo xog ku saabsan adeegyada, iyadoon loo eegin xaalada soogalootinimada. Adeegyada tarjumaada ayaa la heli doonaa.** Bixiyayaasha adeegyada ee khadka caawimada uu u gudbin doono dadka soo waca waxay bixin doonaan adeegyo kala duwan, oo ay ku jiraan caafimaadka jirka iyo maskaxda; gargaar sharci; taageero dhaqanka ku habboon; iyo u doodista dhibbanaha.

**Xogta qofka lagu aqoonsan karo ee loo sheego Khadka Caawimada waa la ilaaliyaa lamana soo dhigi doono bannaanka.** Macluumaadkan waxaa ku jira magaca, magici hore ee sharciga ahaa, naanaysta, magaca dambe ee hooyada, taariikhda ama goobta dhalashada, deegaanka, ciwaanka boostada, lambarka taleefanka, ciwaanka iimaylka, lambarka sooshal sakuuratiga, lambarka laysinka darawalnimada, lambarka akoonka bangiga, iyo macluumaadka kale ee qofka lagu aqoonsanayo (RCW 43.10.305(5)(g)).

Sida sharcigu u baahan yahay, Khadka Caawimada waa inuu waydiiyaa in qofka soo wacay uu arrinta u sheegay laanta sharci fulinta iyo in kale iyo haddii qofka uu jeclaan lahaa inuu sidaasi sameeyo. **Khadka Caawimada wuxuu u gudbin doonaa laanta sharci fulinta kaliya haddii qofka soo wacaya uu oggolaado** waxayna la wadaagi doonaan kaliya xog kasta oo lagu aqoonsanayo ee qofka soo wacayo uu rabo inuu la wadaago. **Laanta sharci fulinta waxaa looga baahan yahay inay xogta meelaha lagala xiriiro khadka caawimada siiyaan** qof kasta oo iyaga u sheega dhacdo nacayb ama eexasho ah.